Somali

Saint Paul Regional Water Services

# SPRWS Ka Madhan Leedh

**SIDAY NOQONAYSAA:** Kahor, Inta Lagu Jiro, iyo Kadib Beddelaada

## KAHOR BEDDELIDA

**1.** Buuxi foomka ujeedada oo jadwalee ballanta dhismaha kahor



**2.** Saxeex foomka heshiiska si aad u sugto beddelkaaga




**3.** Sii mitirka biyaha ee gudaha gurigaaga wakhtiga ballanta



## XILLIGA BEDDELIDA




**4.** Si loo gaadho dhuumaha dhulka hoostiisa, shaqaaluhu waxay qodayaan 2-3 aag mid waddada ah, mid dariiqa weyn ah, iyo suurtogal ahaan mid barxaddaada hore ah. Waxaanu yarayn doonaa waxyeelada soo gaarta qaabka dhulka iyo hantida gaarka sida ugu wanagsan ee aan awoodno.

**5.** Khadka adeegga ee leedh waxa lagu beddelayaa khad kobar ah. Khadka cusub waxa lagu xidhayaa marinka biyaha ee wadada gees ka gees iyo tuubooyinka gurigaaga dhanka kale.

**6.** Shaqaalaha SPRWS Ka Madhan Leedh ayaa tijaabiyay khadka cusub waxayna dhex mariyeen biyo si looga saaro qashinka iyo qurubka leedh.




**7.** Godadka ku yaal barxadda iyo wadada si kumeel-gaadh ah (maaha joogto) ayaa loo celiyay amni ahaan, taasoo siinaysa dhulka wakhti uu ku xasilo.



**SCAN ME**

stpaul.gov/water

1. Fur kaamarada mobilkaaga
2. Ku beeg badhtanka koodhka QR
3. Taabo notification si aad u furto xiriirinta oo ula socoto wax badan

Saint Paul Regional Water Services
**Lead Free SPRWS**
651-266-6820
lead@stpaul.gov

**SOCO LA**

**MACLUUMAADKA CUSUB**

# KADIB BEDDELIDA

**8.** Marka adeegga la beddelo oo adeegga biyaha lagu soo celiyo gurigaaga, ku fur tuubooyinka guriga oo dhan biyo qabow. Ku bilow tuubada ugu hoosaysa ilaa mida ugu sarreysa. Habkani wuxuu nadiifin doonaa dhammaan beebabka biyaha ee dhismaha.



30 daqiiqo kadib markaad biyaha ku shubto, dami qasabadaha adigoo ka bilaabaya heerka ugu hooseeya ilaa kor.







**9.** Ka saar hawo-qaadayaasha/madaxyada qubayska oo ka nadiifi wixii walxo ah ee meeshaas ku ururay.

Hawo-qaaduhu wuxuu badanaa ku yaalaa caarada tuubada oo waa la damin karaa si loo nadiifiyo.



**10.** 30ka maalmood ee xiga, biyo qabow ku dhex fur tuubooyinka gurigaaga ilaa 5 daqiiqo subax kasta (ama muddo dheer oo biyo la'aan ah kadib) kahor intaadan cabbin ama wax ku karin.




*Qaadashada shaawar ama qubays waxay nadiifin doontaa beebabkaaga.*

**XUSUUSNOW:** Mar walba u isticmaal biyo qabow tuubada cabbitaanka, wax karinta, iyo diyaarinta caanaha dhallaanka.





Hay'adda Ilaalinta Deegaanka waxay ku talinaysaa in la isticmaalo shaandhada lagu xaqiijiyay heerka NSF 53 muddo 6 bil ah kadib beddelka khadka adeegga leedh.

Raac tilmaamaha soo saaraha oo ay ku jiraan baakadaha shaandhada si aad u ogaato goorta iyo sida loo beddelo shaandhada.

**11.** Shaqaaluhu waxay ku soo laaban doonaan 120 maalmood si ay u daboolan godadka deyrka, laamiga, iyo waddada oo ay u sii qabtaan xaaladaha hore ee shaqada sida beerida, shubka, laami dhigida, ama isku darda saddexda.




**12.** Waxaanu bixin doonaa tijaabinta muunada biyaha 3-6 bil kadib beddelka si loo hubiyo heerarka leedh.



**Still have questions?**
☎ 651-266-6820
✉ lead@stpaul.gov
💻 stpaul.gov/water

**Spanish**
Para más información, póngase en contacto con el equipo de SPRWS "Libre de Plomo" en el 651-266-6820. Se le facilitará un traductor.

**Hmong**
Kom paub cov ntaub ntawv ntau ntxiv, tiv tauj Lead Free SPRWS pab pawg ntawm 651-266-6820. Yuav muaj ib tus kws txhais lus rau koj.

**Somali**
Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir kooxda Lead Free SPRWS lambarka 651-266-6820. Turjumaan ayaa laguu heli doonaa.

LEAD FREE SPRWS